# Golaha Wakiilada JSl

## Waaxda Hadal Qoraalka

*Minuteska*

**Dooda Mooshinka wax Ka-badalka Xeer /Lr 14**

Kal- fadhigii 16aad | Fadhiyadii 17 iyo 18aad | 17/10/2011

***Doodan waxaa ka qayb qaatay 14 Mudane, waxayna Socotay2 maalmood, waxay bilaabantay 16/10/2011 waxayna dhamaatay 17/07/2011kii***

1. **Md. C/raxmaan cusmaan caalin:-** anuu waxaan waxaan soo jeedin lahaa in laga saaro laba qodob soo jeedimahan ta koobaad waxaa weeyaan qodabka koowaad ee kaabista xeerka mooshinka mudanayaasha iyo qodabka sadexaad soo jeedin ay ka soo jeediyeen oo ah gudidu waxay xilka haynayaan mudo shan sanadood ah oo ka bilaabanta maalinta max kamada xilka loo dhaarsho madax waynuhuna wuu u cusboonaysiin karaa, qodobadaas ayaan laba siyaabood uga halayaa, waxaa weeyaan marka hore waxaa labada looga dhigay howshan ay hayaan waa hawl doorasho intahore ee ay diwaan galinta ku simantahay baynu laba sanadood ka soo qaadanay sadexda sanadood ee danbe waxay lagu xisaabiyay inay galayso hawsha komishanka.

   markaa sida marka horaba xilka labada sano looga dhigay, horana waxaa la soo jeediyay shan sano iyo sanadba intaba waa la soo jeediyay waxaana la isu raacay laba sanadood, markaa waxay ku haboontahay maadaama oo ay hawshu hawl doorasho tahay in xilka la qaybiyo oo xilkooduna inta uu noqonayo loo calaamadiyo oo waliba labada sano ku badan, sadexda sanana waxay noqonaysaa hawlihii doorashooyinka ayay galaysaa markaa hawsha doorashooyinku la wareego ayay noqonaysaa, labada sanaaba ku badnaa marka horaba mudanayaan taa aan tix galino.

   Takale ee ah madaxweynuhu wuu u cusboonaysiin karaa taasna anuu waxaan leeyahay meesha masoo gasho markaa qaabkii lagu an sixiyay mid lamida waa in uu maadaxweynuhu uu soo jeediyo dabadeed ay golaha wakiilada timaado aanu goluhu cusboonaysiiyo anuu labadaa qodob caynkaas ayaan ka dhigi lahaa, hadii ayay naan u daynay labadii sano, waliba waxaan odhan lahaa in laga sii yareeyo maxaayeelay xil u yaala oo doorashooyin ahi ma jiro,

Qodobka kale waxaa weeyi is badan ka ay ka soo jeediyeen Qodobka shanaad oo marka horaba qayrul dastuuriya, waxaad dib ugu noqotaan oo aad akhridaan dastuurka qodobkiisa 111 farqadiisa 7 hadaad wuu xadidayaa wakhtiga golaha planka oo five years ah waxaa kale oo uu xadidayaa golaha gobolka oo isguna marka uu doorasho ku yimaado xilkiisu shan sano uu noqonayo madaama uu xilku shan sano noqonayo xusbigu marwalba oo uu doorsho golaha deegaan jirtaba waa in uu ka qayb galaa, markaa ayay noqonasaa cusboonaysiint.

Tobon sano hadaad tidhaa dorashada ayaa ku dhacaysa toban sanadood markaa Qodobkaasu waa qayrul dastuuri waa in gabigiisaba waa in la saxaa sooo jeedintooda cusub kuma jirto lakiin waxay ku jirataa qodabka hore isaga qayb ka mida ayuun bay amendment ku sameeyeen oo aan isleeyahay runtii way waafaqsantahay, markaa qodobka waa in lagu saxaa shan sanadood oo xisbigu cusboonaysiinayo sharciyadiisa, maadaama doorashadii Golayaasha deegaanku 5 sanoba marbay dhacaysaaye.

Xeerku markuu dhaqan galo oo ciladihii soo baxaan, laakin hadii hadba la yiraahdo halka iyo halkaa wax aan ka badalno ma fiicna, anigu intaas ayaan ku soo koobayaa.

2. **Md. Saleeban Cawad Cali:-** qodobka gudida diiwaangalinta wa la dhigo 5 sano, labada qodob ee madaxweynaha waan taageersanahay, Anigu waxaan qabaa dhowr qodob meel kasta ha ka yimaadee, tan u horeysa waxa weeye gudidu diiwaangalintu maxay xilka ku waayi karaan, sidoo qodobka meesha aan ku jirin ee xeerka looga baahan yahay waxa weeye hadii urur ama xisbi dhexdiis uu khilaaf ka yimaado toos in maxkamada loogu gudbiyo waxaa ka horaysa oo aan taagersanahay in la geeyo gudida diiwaangalinta oo intaanan maxkamadu go'aanka u danbaysa ku dhufan bal in cid dastuuri ahi ka horayso, sidaas haday tahay oo khilaafka ururada iyadu hashaas leedahay waxay noqonaysaa in loo baahdo oo ka garnaqdo, markaa wakhitgeeda waa in la kordhiyaa.

   Habka xilka qaadista waxaan taagersanahay in la yiraahdo xubnaha Gudida waxaa xilka looga qaadi karaa habka loo soo maro Gudida Komishanka, lacagta ururka ee cashuurta diiwaangalinta waxaa ku jirta in la awadaagayo waana tag, tan xubnaha Golayaasha Sharci dejinta iyo xisbigiisa, waxaan qabaa in xibigii la ilaaliyo xubintii la ilaaliyo, markaa wax waxaan qabaa waa inaan xubin xisb oo loo doortay golayaasha sharciga aan aanay ka bixin Karin laga eryi Karin ilaa sharci dalka u yaal jabiyo, hadaba xeerku wuxuu leeyahay xubin iskeed uga tagi karto xisbina ma jirto ilaa ay xilka iska casisho,

   **Qodobka 9$^{aad}$** taasna waxaan raacsanahay qaabka ay gudidu mooshinka u soo dhigtay, mooshinka waxay ahayd in sharci yaqaano loo diro oo la isweydiiyo in gudi mooshin keeni karto, Waxay ahady in mooshinka sharciyaqaan loo gudbiyo oo soo eego wixii iswaafaqsan iyo iswaafaqsanayn uu soo kala saaro, waana in goleheebna waxa ka soo

baxayaa noqdaan wax faa'siido leh, marka muda xileedka gudida diiwaangalintu uu dhamaado waxaa shaqadood la wareegaya Gudida Komishanka qaranka, anigu contradiction baan halkaa u arkaa, laba mid weeye, in Gudida doorashadu uu waliguu jiro, ha la yiraahdo gudida diiwaangalintu waligeed way jiraysaa oo sida komishanka xuquuqal insaanka ayay noqonsaa, waliba haday khilaafka xisbiyada hawsheeda leeyahay, marka hadii la baabiyo in yaa ka garnaqaya khilaafaadka xisbiyada.

3. **Md. Maxamed X. Xusen Ciise:-** wad mahadsantihiin anigu waxaan qabaa labada qodob oo waxkabadalka madaxweynuhu soo gudbiyay ah iyada waan raacsanahay, qodobada 9ka ah ee moshinka lagu soo gudbiyay waan taageersanahay waana saxiixay waxaana u arkaa in xeerkii aynu samaynay ay ka dhinaayeen maadama wax laga badaloyon waan raacin karnaa oo waynu ka doodi karnaa.

   Qodoka 25[aad] waxaan doonayaa in lagu daro faqrad 4aad, taas oo ah marka **l*a furayo urur siyaasadeed, mudanuhu wuu ku biiri karaa ururka kale ama wuu furankaraa urur siyaasadeed ama xisbi markuu u arko in dantiisa maslaxadeed ay ku jirto,*** taas oo aan u arko inuu mudanuhu ka bixi karo xisbigiisii oo meesha uu dan u arko uu gali karo, waa marka ururada siyaasada la furayo.

   Marka faqradaas lagu daro qodobka 25aad, labada qodob ee madaxweynuhu soo gudbiyay iyo wax ka badalka mooshinka ku qoran in xeerka lagu daro, waad mahadsantihiin

4. **Md. Axmed Barkhad Obsiiye:-** waad salaamantihiin, runtii xeerkan oo si isku khilaafsan markaad eegto labada qodob ee madaxweynuhu soo gudbiyay waxaan jeclahay in sidooda loo daayo waayo xeerka uun baa dib u dhacaya, Gudida diwangalintu doorkoodu waa inay kala saaraan axsaabta iyo ururada marka hawshooda ay dhameeyaana waxay u gudbinayaan Komisha doorashooyinka qaranka, anigu waxaan qabaa in ***waxaan soo jeedinayaa*** in labada qodob ee madaxweynuhu keenay sidooda loo daayo, mooshinkan xildhibaanadu soo gudbiyeena la joojiyo.

5. **Md. C/qaadir X. ismacil Jirde**:- labada qodob ee madaxweynuhu soo gudbiyay waxkabadalkooda sababta loo soo celiyay ma cada markaa waa in la cadeeyaa, waxaynu ognahay in xisbiyadeenu ayna u bislayn dimuqraadiyada, waxaynu ognahay barigii ururada la furayay khilaafo badan baa soo baxay dhamaana waxa xaliyay Gudidda diiwaangalinta markaa anigu waxaan qabaa in gudiddu ku ilaaliso oo hadii xisbi sharci jabiyo ama khilaaf uu yimaado ay gudidu wax ka qabato, sidaa darted waxaan taageersanahay Qodobka 3aad oo ah in Mudada 5 sano gudidu jirto iyo wax kabadan hadii laga dhigi karo.

   Waxaan ka soo horjeedaa in gudi gudi loo dilo, labada gudiba xeer baa jideeyay waxay kula duwanyihiin gudida diiwaangalintu waxay la xidhiidhaa stakeholderska oo inaga ah,

laakiin Gudida doorashadu isago hay’ado shisheeye ayuu la xidhiidh oo uu qancinayaa, 10 sano ee ruqsada lasiinayo marka xisbigii 10 sano ka dhamaato dee legal personalitygii wuu lumiyay markaa waxaa halkaa ku haboon in period loo sameeyo markuu ka dhaco lisankii uu dib ugu soo cusboonaysiisan karo.

Xidhiidhka ka dhexeeya xildhibaanada la soo doortay iyo xisbiyada dhacay ee lega personlitygii lumiyay muxuu noqonayaa? Waxaynu nidhi markaanu xeerka samaynay yaan loo kala guurin xisbiyada, xildhibaanu ilaa uu jabiyo shuruucdii dalka u yaalay xisbi lagama saari karo maxaa la difaacay ma xisbigaa? Waxaa la difaacayay xubinimada golaha, xisbiyada waa la difaacay maskaxda ka danbaysaana waa taas, su’aasha imanaysaa waxa weeye xildhibaankii iga horeeyay wuxuu soo jeediyay marka xisbigii 10 sano ka dhamaato ee ruqsadii ka dhaco, Mudanuhu xor ma u noqonayaa inuu meeshuu doono galo, taas ayaa u baahan in laga fakaro.

Tan lacagta, xisbiyadu lacag maalgashi bay u baahanyihiin oo dadkeenu ma yaqaanaan waynuba u shaxaad tagnaa, markaa waxaan qabaa in xisbiyada la maalgaliyo oo cida maalgalinaysaa iyo lacagtu ka imanaysaa ay transparent noqotaa oo la ogyahay, hadaynaan taas kantaroolin oo la ogaan meesha lacagtu ka imanayso waxaa dhici kara in xisbiyada dalal shisheeye oo dano leh ay maalgaliyaan, markaa in la gudidu baadhaan oo ogaadaan halka kharashaadku ka soo galo xisbiga

6. **Md. Xusen Ismaciil**:- waad salaamantihiin, anigu marka hore amendmentka madaxweynaha inooga yimi maadaama aanu sababaysnayn waxaan ku waafaqsanahay mudanihii iga horeeyay, oo halka uu 45 casho ka dhigay waxaan qabaa in 60 casho loo daayo, tan kale ee wax ka badalka mooshinka anigu dhamaan qodobada ku jira sidooda ayaan ku raacsanahay marka laga reebo qodobka ka hadlaya lacagta, kaas waxaan qabaa in laga daayo yaanu qof kaliyi bixinta, oo muhiimadu tahay in lacagta meeshay ka imanayso la ogaado oo transparent ahaato, laakiin hadii qof bixiyo iyo hadii wax ka badan bixiyaan waa isku mid.
7. **Md. Aadan X. Diiriye Dirir**:- waad mahadsantihiin, Qodobada dastuurka ee 8,9, 22,23, 40,111 iyo 127[aad] markaan la akhriyay wax ka badalkan iyo mooshinka la inoo soo gudbiyay waxaa iiga soo baxay, maadaama oo uu xeerkii

   Qodobka 5aad F/3aad xarafka (t) ma cada markaa waa in xeerka laga saaraa, Qodobka 3aad waxaan taageersanahay in shantaa sano laga dhigo mudada gudida mar haday iyagu xisbiyada ku ilaalinayaan demoqraadiyada, khilaafkooda ka garnaqayaan.

8. **Md. Dr. Cali Yusuf:-** Gudoomiye waxaa la qaybiyay laba waraaqood mid ka timid madaxweynahah taas waxaan odhan lahaa waa inla siiyo 60 maalmood oo markii horeay ahayd, **Qodobka 3[aad]** ee mudada Gudidda waxaan odhan lahaa 5 sano hala daayo, **Qodobka 4[aad]** waxaan odhan lahaa si xisbigii loo wada yeesho lacagta hala wada

bixiyo,oo si loo wada yeesho yaanu qofkaliyihi bixin, waliba golaha dhexe ee xisbiga waa bishii contribution bixiyaa is le'eg oo dhigaal ay u noqotaa oo xisbi walba lagu waajibiyo in bixiyo dhigaalkaa monthly basis.

**Faqrada (s)** waxay leedahay hadii saddexda xisbi qaran mid ka mid ahi uu shuruudihii xeerarka mid ka soo bixiyo waayo xubinimadii wuu waayayaa, halkaa waxaa jabaya qodob dastuuriya oo sheegaya wadanka waxaa ka jira Saddex xisbi qaran, marka waxay noqonaysaa in laba soo hadho hadii midkale jabiyona midbaaba soo hadhaya, sidaa darted halkaa anigu waxaan odhan lahaa hadii saddexda xisbi qaran midkood jabiyo xeerarka u yaal ama dastuurka qodob ka mida in ganaax la saaro kolba danbigaasi intuu le'egyahay in u dhiganta, hadiise ay noqoto inuu xisbigaasi uu noqdo mid caadaysta oo uu danbigu soo noqnoqdo waxaa laga saari xisbiga mid ka mida doorashooyinka,

9. **Md. Axmed Maxamed Obsiiye:-** marka hore waan salaamaya golaha, runtii umaan kicin dood badan, anigu marka hore waxaan leeyahay madaxweynuhu xaq buu u leeyahay inuu labadaa qodob inagu soo celiyo isagoo sababaynaya soo celintaas si dastuuriya, waana taageersanahay, xildhibaanada mooshinka keenayna way ka hordheceen baan qabaa si uun bayna u rakaan waana xeer aan dhaqan galin oo goluhu ansixiyay, xeerka hadii amendment laga dhigo isagoo dhaqan galin waxay keenaysaa dhibaato.

   Waxaa haboon maadaama oo soo celinta madaxweynuhu waafaqsantahay dastuurka, in taas uun la qaato oo labadaa qodob ee inagu soo celiyay laga dodo, mooshinka xildhibaanadu keena marka xeerku dhaqan galo uun la keeno, oo aan laga hordhicin dhaqangalka xeerka maadaam goluhu ansixiyay, oo aynu ka doodnay waxyaabaha halkan ku qoran, intii la isla gartay baynu qaadanaya oo ansixinay madaxweynahana u gudbinay, wax ka badal deg deg ahina dhibaato badan buu keenayaa.

   **Waxaan soo jeedinayaa:-** waa in wax ka badalkii madaxweynuhu sideedii u socotaa, mooshinka xildhibaanadu keeneen ee wax ka badalka iyo kaabista anigu ma waa faqsani markaa isaga waxaan qabaa in isaga la joojiyo.

10. **Farxan Maxamed Cali:-** anigu marka hore labada qodob ee madaxweynuhu keenay oo ku salaysan baahida loo qabo doorashada oo ah in ay qabsoonto doorashadu waan ku taagersanahay, hadaan soo jeedinta mooshinka xildhibaanada galo, **Qodobka 3$^{aad}$ faqrada 1$^{aad}$** waxay soo jeediyeen gudi ku meel gaadha, waxaa jirta gudi diiwaangalin oo shaqadaa iska leh markaa gudidaa ay soo jeediyeen ha laga daayo markaa waxaan leeyahay faqradaas ha laga saaro.

    Isla **Qodobka 3$^{aad}$** waxaan taageersanahay in mudada gudida 5 sano laga dhigo, waxaana jirta in xeerkan 14 ay ku shaqaynayaan Gudidda diiwaangalintu, waana loo baahan gudida inay noqoto gudi jirta oo shaqaysa si ay u kala saarto tusaale ahaan hadii xisbi lumiyo ama jabiyo shuruudihii side loo badalayaa, Qodobka sheegaya .lacagta la

leeyahay waa in la wada bixiyaa hawshaasi waa mid u taal xisbiga waana in loo daayo xisbiga xoriyadiisa meeshaan doonaan iyag ha ka soo urursadaane.

Waxaan kaloo ka saari lahaa qodobka lisanka 10 sano xeerkeeni hore waxay u qoran tahay, 10kii sanoba marbaa la furayaa ururada oo wareega labaad doorashadan markay dhacdo tan ku xigta maahee tan sadexaad baa la guray oo doorasho dhaafa, marka qodobkan 10 sano cayimada meesha kuma jiro anigu waan ka saarayaa. Mudada 5 sano haduu uu lumiyo oo kale xisbigu amaba sifo sharci ah lookala diro, waxaweeye gudida diiwaangalinta ayaa naadinaya booskaa banana loo baratamo oo doorasho loo qabto.

**Qodobka 19[aad]** sidaa uu sheegay baan ku daynayaa, kan hantidhowrka madaxbanaani waa inay xisbiga dhexdiisa ka timaadaa oo golaha dhexe ee xisbigu dalbadaa, hana lga daayo in xisbiga gudiihia la fara galiyo hadaanay maxkada sare ogolaan oo sifo sharci ah loo soo marin dacwada keentay aanay jirin.

***Waxaan ku soo gaba-gabayn lahaa:-*** muda gudida 5 sano ha loo daayo, labada qodob ee madaxweynuhu keenayna oo sabaysan waan taageersanahay.

11. **Md. Xaashi Xusen Caabi:-** anigu waxaan leehaya mooshinka xildhibaanadu keeneen waa mid loo baahanyahay qodobada ay halkan xildhibaanadu ka soo jeediyeen waa loo baahanyahay inaynu badalno manta,bari iyo markaleba marhadaynu u aragno in baahi keentay , anigu waxaan qabaa axsaabteena oo aan u bislayan dimuqraadiyada, shanta sanadoodna waan taageersanahay oo gudidu xisbiyada ha ku ilaaliyaan dimuqraadiyada, ruqsada waxaa la yidhi waa laga noqonayaa ururkii jabiya waxyaabihii lagu siiyay, makaa waa in la cadeeyaa oo la sheegaa in gudidu tahay cida kala noqonaysa,
Qodobkan xisbiyada ee ku ilaalinta dhaqanka dimuqraadiyada iyo xeerkan ama shuruucda, waa mid loo baahanyahay, markaa inta axsaabtu jidka toosan wada qabsanyaan oo lawada yeelanayo oo dadkeenu qabyaalda iyo wayaabahan xun ay ka xoroobayaan, in la ilaaliyo oo xadhiga lagu hayaa weeye si aanay dimuqraadiyada ugu tacadiyin, markaa anigu waxaan qabaa in qodobkan iyo qodobo kale loo baahanyahay in lagu xakameeyo axsaabta waana sababta gudidan loo samaynayay.

Qodobkan 10 sano isaga marka doorashadan dhacdo hadan mid kalaa dhacaysa 5 sano ka dib waana loo baahan yahay markasta cid ilaalisa sadexda xisib ee soo baxa markaa markay gudida 5 sano ka dhamaato waxaa loo baahan yahay in mid kale la magacaabo, oo aan marnaba meesha vacuum imanin wixii axsaabta la xisaabtamay, xillka qaadista xubnaha gudida qodobka ka hadlayana isagu waa ok waana waafaqsanahay, hadii mudadii xilka gudida ay dhamaato, anigu halkaa waxaan ka dhigi lahaa qaarkood ama dhamaantood.

Waxaa jira iska daaya kalmadan farqda aad u qortaan kalmadu waa faqrad sidaasayna ku sax ku tahay waa carabiye ama kalmad somaliya keena, waana inaynu xagaajinaa waxa

inagoo soo baxaya sharci dejin ahaan, qodobka lacagta ururka cida bixinaysa hadii qof ama laba qof bixiyaan maxaa dhacaya halkan kuma qorin, markaa waxaan halkan ku dari lahaa horta ***waxaa daba gal iyo hubin ku samayna uun baa la yidhiye in wakhti loo sameeyo oo aan hubin uun lagu dayne, la yiraahdo waa in hubin iyo dabagal 30 maalmood gudohood gudidu ku samaysaa.*** Haday ku cadaatona waxa lagu samaynayo waa in la cadeeyaa miyaa la ganaaxayaa mise waa laga saarayaa, marka halkaa ha la cadeeyo.

Mudada 10 sano ee ruqsada la siiyana waxaa qoran haduu jabiyo shuruudihii ruqsada lagu siiyay waa laga noqonayaa cida kala noqonaysa waa in la cadeeyaa oo la yidhaahdaa ***Gudida diiwangalinta iyo ansixinta axsaabta ayaa kala noqonaysa.*** Qodobka 6aad faqradiisa 9aad halka ay ku qoran tahay laga saari Karin/eryikarin, anigu waan ka saari lahaa gabigaba, anigu waxaan ka hadlayaa xisbi ka hadli meel nin kaliya uu leeyahay, marka xisbigii la wada leeyahay ka saarid iyo eryid waa mid aan macquul ahan, waana ay adagtahay in qof laga saaro xisbi hadaanu ahayn qof dagaalamay oo loo caalwaayay sharcigiina jabiyay, laakiin qofku xisbiga wuu ka bixikaraa kumuu dhalane, xoriyadiisiina qofku waa uu leeyahay, eryidan ka saaridan waxa loo jeedo waa qofku kama bixi karo, taasina macquul maaha wuu ka bixikara xoriyadiisina wuu leeyahay.

12. **Md. Axmed Ducaale Bulaale:-** anigu waxaan qabaa xeerkan oo aynu hore u ansixinay iminka wuxuu inoogu iman karaa amendment, waxaana kolaha lagu keeni kara siduu dastuurku sheegayo saddex siyaabood, 1.in Xubno xildhibaano ahi keenaa 2. In xukuumadu soo gudbiso iyo 3.in tiro muwadiniin ahi keenaan.

    markaa waxaan qabaa **Qodobka 3[aad]** gudida laba sanaynu ka dhignay laguna dhaariyay, markaa hadii 5 sano laga dhigo ma marlabad baa la dhaarinayaa, mida kale gudidu shaqadeedu waa inay ururada siyaasada soo xusho inaynu labada sano u dayno ayaan qabaa oo iyadaaba iangu badan 6 bilood bay hawshooda ku dhamaynsan karaane, oo hashadaba gudida doorashooyinka ku filnaa sidii xildhibaankii halkan inoogu yimi sheegay gudida doorashooyinka ayaa axsaabta ku ilaalisa dimuqraadiyada oo dabagasha.

    **waxaan soo jeedinayaa**:- laba amendment ma jiraane, kii madaxweynuhu keenay aan ka doodno oo aan ansixino,

13. **Md. Aadan Tarabi Oogle:-** anigu waxaan garan waayay labada qodob ee madaxweynu keenay iyo mooshinka waxa la isku soo dhex dhigay, labada qodob ee madaxweynuhu keenayna ma sababaysna, waxay ahayd in la soo sababeeyo, oo shirgudoonku madaxweynaha intay ku ceshaan yiraahdaan soo sababee, laakiin maaha in inta labadii qodob oo baahida keentay sababteedu aanay cadayn inta lana soo dhex dhigo halkan qolo kale mooshin iyo qodobo kale dhexdhigaan, waana in laka saaro labada qodob iyo mooshinka,**.**

Labada gudi ee Komishanka iyo Diiwaangalintu way isa sudhanyihiine, yaan la isa sii sudhin waa laba gudi oo laba xeer ku samaysan, markaa bari waxaynu arkaynaa iyadoo doorashooyinkii dib u dhaceen oo mudo kordhin kale timi.

***Waxaan soo jeedinayaa:-*** labada sanadood gudidaasi ha ku ee kaato shaqadeedu oo ah sidaynu ku ansixinay.

14. **Md. Ibrahim Axmed Raygal:-** waad salaamantihiin marka hore, laba qodob ayaan xoogaa ku biirin lahaa wuxuu sheegayaa in tiro lcagta ururka bixiyaan markaa si aynu uga baxno in ururka qof kaliya yeelan lacagta waa qofkaliyihi bixin, qodobka xisaabtana waxaan odhan lahaa xisaabiaya qaranku way u yeedhan karaan,

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSl** |
| ------------------------------------------------------------ | ------------------------------------------------ |